

4.4 Dhibaato miyaad ku qabtaa in aad meelahaas soo marmarto?

Ma hubtid miyaa haddii aad heli karto guryaha dadweynaha agtaada ah?

Golaha Degmada Melbourne wuxuu leeyahay khariidad socod oo magaalada ganacsiga ee dhexe waxaana laga hellaa iyada oo la wacayo 9658 9658 ama TTY 9658 9461.

Xarunta socodka Melbourne waxay caawimi kartaa dadku inay ku geli karaan kuraasta lagu socdo. Wac 9650 6499 wixii intaas ka badan.

Golahayaasha kale oo agtaada ah ayaa joogto dib ugu eega oo cusboonaysiisa macluumaadka bulshadu heli karto sidaas darteed haddii aad wacdo ama codsato ama sarkaalka Access for All Abilities (AAA) ama Sarkaalka Metro Access waxay awoodi doonaan inay ka jawaabaan waxweydiintaada. Faahfaahinta cidda lala xiriirayo waxaa laga heli karaa xaashida macluumaadka ee kitka 4.7.

Ma hubtid miyaa inaad heli karto meelaha la aado oo caanka ah?

Meel fiican oo laga fiirin karo online wixii macluumaad ah oo ku saabsan gelida meela badan sida xarumaha wax laga gato, meelaha lagu cayaaro, iyo meelaha loo daawasho tago oo waaweyn.

www.accessibility.com.au

ama ka eeg Degmada Melbourne www.accessmelbourne.vic.gov.au

Ma u baahan tahay caawimo si aad u gasho goobaha munaasabadaha?

Kaararka Companion waxaa loo ogol yahay daryeelayaasha iinta qaba inay ku galaan lacag la'an munaasabadaha dadweynaha (sida Cayaaraha, Farshaxanka, Muyuusiga iwm.) Waxaad xaq u leedahay kaar haddii aad qabto iin joogto ah oo weyn baahidaaduna tahay mid weligeed ah. Wac 1800 650 611 ama booqo www.companioncard.org.au

Fasaxa gaari dhigashadu ma ku caawimayaa?

Fasaxyada dhigashada waa la heli karaa iyada oo la wacayo golaha lana codsanayo foomamka si fasax loo dalbadu. Foomamka golayaasha qaarkood waxaa lagala soo bixi karaa bogooda websaytka. Waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso foomka kuna soo celiso xafiiska Golaha. Waad arki kartaa macluumaadka xaashida kitkan 4.7 ee 'Sidee kula xiriiri karaa golahayga degmada' gelida adeegyada golaha.

Taksi ma xiran tahay laakiin dhibaato ma ku qabtaa bixinta lacagta?

Haddii aad qabto iin joogto ah taas oo kaa celinaysaa inaad raacdo gaadiidka dadweynaha taksiguna yahay xalka keliya ee aad wax ku heli karto waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeellato **Multi Purpose Taxi Program** (MPTP) (kaas oo kaa bixinaya ½ qiimaha ilaa \$30 safarkiiba). Si aad u hesho koobiga foomka dalabka ee MPTP wac **Victorian Taxi Directorate** tel **9320 4300. M50 Taxi's** (taksi loogu talagalay inuu qaado kursiga lagu socdo) ayaa laga ballansan karaa tel: **8413 7202.**

Travellers Aid Society Victoria

Level 2, 169 Swanston Street, Melbourne,

Tel: 9654 2600 ama booqo www.travellersaid.org.au

TAAS waxay caawintaa dadka iinta leh oo u baahan daryeelka shakhsiyeed si ay u gaaraan madax banaanaada ugu weyn. Adeega waxaa lagu bixiyaa lacag la'aan iyada oo aan u baahnayn ballan, xawilaad, ama qiimayn.



Golayaasha qaarkood waxay ku bixin karaan gaadiid ballanta dhakhtarka, dukaamada iyo tas-hiilaadka. Macluumaad intaas la xiriir golaha.